



Göteborgs
Stad

Jihaynta waalidiinta

Loogu talogalay carruurta, dhalinyarada iyo waalidiinta.
Hawlo firfircooni, talooyin iyo taageero.



Kusoo dhawow

Jihayntaan waxaa loogu talogalay adiga waalidka ah, iyo adiga wayn ee la jooga carruurta. Waxaa sidoo kale loogu talogalay adiga ka shaqeeya carruurta, waalidiinta iyo qoysaska.

Jihaynta waalidiinta wuxuu ka helaysaa warbixinno ku saabsan Galbeedka Göteborg, aagga laga soo bilaabo Röda Sten oo dhanka waqooyi ku taal illaa Välen oo dhanka koonfureed ku taal, tusaale ahaan:

- » Goobo xiise leh oo la wada booqan karo
- » Waxyaaloo xiise leh oo lasoo ogaan karo
- » Warbixinno ku saabsan dugsiga xannaanada iyo iskuulka
- » Talooyin iyo taageero qoyska loogu talogalay
- » Meelaha laga la xiriiro daryeelka caafimaadka

Waxaan rajaynanaa inaad farxad ka heli doontid jiheeyaha waalidiinta.

Innehåll

Goobaha lagu kulmo iyo xilliga firaaqada	7
Dhaqan loogu talogalay dadka oo dhan	12
Ururo	16
Soo arag deegaan dabiici	23
Öppna förskolor	25
Dugsiga xannaanada	26
Iskuul	27
Talo iyo taageero ku socota waalidiinta, da'yarta iyo carruurta	29
Hage (qof kugu caawinaya inaad heshid warbixinta iyo caawinaadda aad u baahan tahay) loogu talogalay carruurta iyo dadka waawayn ee lixaadkoodu dhamaystirnayn	35
Markii hanjabaad iyo xoog adeegsi ka dhex dhaco dad xiriir dhow leh	42
Kuwo kale oo aad la xiriiri	46

Halkaan waxaad ka helaysaa tusaalooyin meelaha la aadi karo iyo waxyaalaha aad samayn kartaan adiga iyo ilmahaagu. Waxaa jira meelo intaa kasii badan oo aad ka heli kartid jiheeyaha. Kasoo hel khariidada.



Hitta på kartan

1. Bergkristallparken
2. Kastanjeträffen
3. Ungdomens hus 1200 kvadrat
4. Frölunda kulturhus
5. Maktabadda buugaagta Södra Skärgården
6. Xarunta aalmiitada iyo jimicsiga Påvelund
7. Xarunta isboortiga Ruddalen
8. Saltholmens badplats
9. Dabaasha Fiskebäcksbadet
10. Ganlet
11. Näsetbadet
12. Smithska udden
13. Styrsö Brattens badplats
14. Styrsö Utterviks badplats
15. Buurta Skärvallsberget
16. Välen
17. Dugsiga xannaanada furan Opaltorget
18. Dugsiga xannaanada furan Furåsen
19. Stor & liten (yar iyo wayn), meel u furan adiga ilmaha yaryar guriga ku haysta

Sharaxaad pictogram

Meelaha xilliga firaaqada/ ururada xilliga firaaqada	Dugsiga xannaanada furan	Jimicsi bannaanka lagu sameeyo
Aalmiito (jimicsi)	Wax akhris (maktabadda buugaagta)	Ku socosho kabaha barafka
Soo lugayn	Dhaqan	Dabaal
		Ciyaarid



Goobaha lagu kulmo iyo xilliga firaaqada

Goobaha ciyaaraha

Da' kasta

Waxaa Göteborg ku yaal meelo badan oo lagu ciyaaro. Bogga *goteborg.se/lekplatser waxaad ka helaysaa warbixin ku saabsan goobaha ciyaaraha magaalada ku yaal. Wuxuu ku jiraa App Store iyo lekplatsappen.se.

Bogga internetka:

goteborg.se/lekplatser



Markii aad labadaan calaamadoo dhood aad ku aragtid barnaamijka waxay la micne tahay in waxaas laga helo facebook iyo/ ama Instagram

Bergkristallparken

Da' kasta

Xadiiqadu waa goob loogu talogalay ciyaar, wada kulmid, aalmiti iyo nasasho. Halkaan waxaa ku yaal meel cabbirkeedu yahay 460 mitir oo aad ku wadi kartid "skateboard", BMX, "rollerblades" (kabo shaagag leh) ama "kickbike". Xadiiqada waxaa ku yaal garoon kubadda kolayga, garoon banooni, masrixayad iyo meel wax lagu beero.

Parkhuset Shaqaale baa jooga wakhtiyada maalinta ah maalmaha qaarkood. Wuxaad sidoo kale guriga ku qabsan kartaa kulamo, kulamo khibrad isdhaafsi (workshop) ama isku imaatinno kale. Goobta kulamada waxaa maamula Göteborgs Stad iyadoo la kaashanaysa dadka deegaanka, ururo iyo iskaashatooyin meelaha u dhow ka jira.

Cinwaan: Bergkristallparken, Bergkristallparken 1

Telefoon: 031-366 44 16

E-mail: bergkristallparken@vastra.goteborg.se

Bogga internetka: goteborg.se/wps/portal/enhetssida/fritid-vastra-goteborg/bergkristallparken/



Kastanjträffen

Da' kasta

Kastanjträffen waa guri loogu talogalay dadka deggan Tynnered ee raba inay kulmaan, hawlo wada qabtaan oo ka wada shaqeeyaan inay si wanaagsan u wada horumariyaan xaafadda. Waan kugu soo dhawaynanaa inaad ka qaybqaadatid oo aad naga la shaqaysid wixii lagu qaban lahaa lookaalada Kastanjträffen iyo xaafadaba. Barta kulan waxaa maamula Göteborgs Stad iyadoo la kaashanaysa dadka deegaanka, ururo iyo iskaashatooyin meelaha u dhow.

Waxaa u dhow guriga goob isboorti xaafadeed oo leh waxyaalo ay ka mid yihiin garoon kubadeed gacan ku samays ah, garoon kubadeed iyo meel lagu ciyaro kuulaha "boule".

Cinwaan: Kastanjträffen,
Smaragdgatan 28

Maxado: Skattegårdsvägen eller
Smaragdgatan

Telefoin: 031-366 47 29

E-mail: kastanjtraffen@vastra.gotborg.se

Bogga internetka:
goteborg.se/kastanjtraffen

Hawlaha furan ee xilliga firaaqada

10–13 sano

Meelaha xilliga firaaqada waxay shaqeeyaan iskuulka kaddib, fiidakii, maalmaha fasaxa ah iyo maalmaha iskuulku xiran yahay. Halkaan waxay

ilmuhu ka gadan karaan cunto dhexe oo ilmuu waxay ka qaybqaadan karaan hawlo firfircooni oo qorshayntooda ay ka qaybqaadan karaan. Kuma xirna iskuulka ilma-haagu dhigto- dhammaantood waan soo dhawaynanaa!

Laga bilaabo 2021 waxaa ardayda dhigta dugsiyada hoose dhexe ee degmada Göteborgs loo fidinayaa in lagu hayo meesha ilmaha lagu hayo markii iskuulka laga fasaxo (fritids-hem). Kasii akhri wixii intaa dheer oo ku saabsan meesha ilmaha lagu hayo markii iskuulka laga fasaxo.

Lilltyrolen

Waxyalo gelinka danbe la sameeyo oo loogu talogalay da'aha 10–13 sano.

Cinwaan: Lilltyrolen, Safirgatan 14

Telefoon: 031-366 41 76

Bogga internetka: goteborg.se/wps/portal/enhetssida/fritid-vastra-goteborg/tyrolens-fritidsgard

Mellangården

Waxyalo u furan oo loogu talogalay da'yarta da'doodu u dhexayso 10–13 sano.

Cinwaanka booqashada:
Mellangården Smaragdgatan 28

Telefoon: 031-366 41 79

Wakhtiyada ay furan tahay:
Isniin- jamce saacadaha 14–17
Maalmaha iskuulku fasaxa yahay saacadaha 10–16

Bogga internetka:
goteborg.se/grundskola

Meelaha xilliga firaaqada

Meelaha xilliga firaaqada waa goobo lagu kulmo oo loogu talogalay dhalinyarada ku nool Göteborg. Halkaan dhalinyaradu iyagaa ka qaybqaata inay habaystaan waxa ay rabaan inay sameeyaan xilliga firaaqada. Waxay noqon kartaa inay bilaabaan koox muusiig, inay filimo habeenkii daawadaan, wax midabeeyaan ama iska fadhiyaan oo sheekaystaan.

Bogga internetka: goteborg.se/wps/portal/start/kultur-och-fritid/fritid-och-natur/traffpunkter-lokaler

Lokal 426

Guri dhalinyaro loogu talogalay adiga da 'diisu u dhexayso 13 illaa 19 sano.

Halkaan waxaa ku yaal lookaal qoob ka ciyaar, shaneemo yar, qol farshaxanka lagu sameeyo, maqaaxi qaxwe, jiko, iyo qol wayn oo bandhigiyada lagu qabsado. Halkaan waxaad soo qabanqaabin kartaa Lan, bandhig muusiig, wax soo bandhigid ama wixii kale ee aad danaynasid.

Waxaa jira koorsooyin iyo kulamo khibrad isdhaafsi (workshop), tusaale ahaan ku saabsan kaban, koorsa Dj, filin/sawir, iskuul rrock, taxanaha gacanta lagu sameeyay ee Manga, qoob ka ciyaar, ama koorsooyinka aad jeceshahay. Waxaa jira sidoo kale istudyow muusiig, lookaal muusiga lagu barbarto iyo

istudyow sawirro iyo filimo. Bogga internetka waxaa ku jira warbixin ku saabsan wakhtiyada ay furan tahay. Kusoo dhawow inaad nasoo martid!

Cinwaan: Lokal 426, Ängkärrsvägen 22

Telefoon: 031-366 10 72

Bogga internetka: goteborg.se/wps/portal/enhetssida/fritid-vastra-goteborg/lokal-426



Meesha xilliga firaaqada

Tyrolens

13-18 sano

Goobta kulan ee Tyrolens waxay ku taal Tynnered, Galbeedka Göteborg. Halkaan waxaa ku yaal lookaal qoob ka ciyaar, istudyow wax lagu duubo, lookaal muusiig lagu barbarto, qalab filin lagu sameeyo, mashin dhar lagu daabaco, qalab, dj, qol farshaxan lagu sameeyo, meel wax lagu hindiso, jiko, maqaaxi qaxwe iyo qol wayn oo badhigiyada lagu qabto. Wuxaan bixinaa koorsooyin iyo kulamo khibrad isdhaafsi (workshop) oo tusaale ahaan ku saabsan kabanka, Dj, filin, durbaan tumid, biyaano, qoob ka ciyaar, ama koorsooyin kale oo aad jeceshahay. Bogga internetka waxaa ku jira warbixin ku saabsan wakhtiyada ay furan tahay. Si diirran usoo dhawaaaad!

Cinwaan: Tyrolens Mötesplats, Safirgatan 14

Telefoon: 031-366 41 76

Bogga internetka: goteborg.se/wps/portal/enhetssida/fritid-vastra-goteborg/tyrolens-fritidsgard



Öhålan

Fasallada 6-9

Meesha xilliga firaaqada waxay ku taal jasiiradda Styrso ee ku taal jasiiradaha koonfureed ee Göteborg. Halkaan waxaad u imaan kartaa inaad wakhti la qaadatid saaxibadaa oo waxaa ku suurtagal ah inaad la timaadid wixii fikrado ku saabsan waxaad rabtid inaad samaysid. Waxaa laga yaabaa inaad ku riyootid inaad wax soo abaabushid, kulamo aqoon isdhaafsi (workshop), koox dan wadaag ah, ama wax kale.

Waxaan leenahay tv, x-box, ciyaaro badan oo la wada ciyaaro iyo far-samayn waxyaalo yaryar. Wuxaa dhagaysan kartaa muusiig, ka gadan kartaa macmacaan maqaaxida qax-waha. Waxaa jira hool jimicsi oo aad isticmaali kartid.

Cinwaanka booqashada:

Svante Orells Väg 14

Telefoon: 070-265 35 59

Bogga internetka: goteborg.se/wps/portal/enhetssida/fritid-vastra-goteborg/ohalan



Ungdomens hus 1200 isku wareeg ah

13-20 sano

Maxadada tareenka dusheeda. Frölunda Torg waxaa ku yaal Ungdomens hus 1200 isku wareeg ah, oo loogu talogalay dhalinyarada laga soo bilaabo da ´da 13 sano. Halkaan waxaa xoogga la saarayaa fikradahaaga iyo ihtimaamkaaga. Shaqaale khibrad leh baa kugu taageeraya fikradahaaga. Waxaa laga yaabaa in kooxo guriga lagu maamulo, xaflado muusiig ah lasoo qabanqaabiyo ama la tolo oo la naqshadeeyo waxyalo kala duwan.

Cinwaan: Mandolingatan 47
Västra Frölunda

Maxadada: Frölunda torg

Telefoon: 031-366 26 94

E-mail: 1200kvadrat@afh.goteborg.se

Bogga internetka:
goteborg.se/ungdomenshus



Waxyaalo la qabto xilliga iskuulku fasaxa yahay

Xilliga iskuulku fasaxa yahay waxaa jira waxyaalo xiise leh oo loogu talogalay carruurta iyo dhalinyarada labadaba. Ka fiiri bogga ay ku qoran yihii waxyaalaha xilliga iskuulku fasaxa yahay la qabto ama

ku yaal Göteborgs Stad kalendarium si aad u aragtid waxa ka jira.

Bogga internetka:
goteborg.se/lovaktiviteter
och kalendarium.goteborg.se

Goob kulan loogu talogalay qoysaska qansax roobaadka (qoysas dad isku jinsi ah ama aan isku arkin inay jinsi gaar ah ka tirsan yihii ee lagu soo gaabiyo (HBTQ)

Halkaan waxaa jira fursad ilmaha iyo dadka waawaynba ay kula kulmi karaan dad kale oo xaalado qoys oo isku mid ah ku sugar yihii. Wuxaad isdhaafsan kartaan khibrado, wada qaxwayn iyo wada ciy-aarid. Wuxaan isku arkaynaa guriga dhaqanka Kåken laakiin mararka qaarkood waxaa isku arkaynaa meelo kale oo magaalada ku yaal. Wixii warbixin intaa dheer waxaad ka helaysaa guriga dhaqanka bog-giisa internetka.

Cinwaan: Kulturhuset Kåken,
Kålltorpsgatan 2

Maxadada: Härlanda
Stockholmsgatan

Telefoon: 031-365 50 60

E-mail: regnbagsfamiljer@
goteborg.rfsl.se

Webbplats: goteborg.se/kaken



Dhaqan loogu talogalay dadka oo dhan

Frölunda kulturhus

Da' kasta

Waxaad Frölunda kulturhus ku dha-gaysan kartaa muusiig, ku daawan kartaa masrixiyad carruurta loogu talogalay, shaneemo ka geli kartaa, qoob ka ciyaar ama bandhigyo indhosarcaad ama tijaabi indhosarcaad (siirkus) cusub. Qolka wax lagu hindiso waxaad ku tijaabin kartaan midabayn loogu talogalay da'o kala duwan. Halkaan waxaa ku yaal meelo wax lagu farsameeyo oo dadka u furan oo leh mawduucdo kala duwan iyo farayaamada ax-adda. Waaan sidoo qabanaa soo badhigid farshaxano.

Xilliga Kulaylaho wuxuu Kulturhuset soo qabanqaabiyya waxyaalo xiise leh oo bannaanka Positivparken ee ku yaal Frölunda lagu qabto.

Warbixin ku saabsan wakhtiyada uu furan yahay guriga dhaqanka iyo barnaamijiisa waxaad ka helaysaa bogga internetka.

Cinwaan: Valthornsgatan 13
Västra Frölunda

Maxadada: Frölunda torg

Telefoon: 031-366 27 25

E-mail: reception.kulturhuset@kultur.goteborg.se

Bogga internetka:
frolundakulturhus.se



iskuulka dhaqanka

6-19 sano

Kulturskolan ee ku yaal Göteborg waxay ilmaha da 'doodu tahay 6-19 sano tijaabin karaan oo horumarin karaan aqoontooda maadooyinka fanniga (qurxinta). Waxay noqon kartaa qoob ka ciyaar, masrixiyad, midabayn, samayn alaab dhoobo ah, heeso la isla qaado, filin iyo qalab kala duwan oo muusiig.

Qalabka muusiingga waxaa laga soo kiraysan karaa Instrumentförrådet waana bilaash labada sano ee u horreya. Halkaan waan kusoo dhawaynaa ilmahaaga mar waliba, iyadoo aan loo eegayn aqoontiisii hore ama baahida!

Hawlaha Kulturskolan waxaa lagu qabtaa iskuullo kala duwan oo ku yaal galbeedka Göteborg iyo lookaaladeena ku yaal iskuullada Tynneredsskolan, Dalaskolan, Kannebäcksskolan iyo Frejaskolan.

Khidmada lixdii bilood uu qaado Kulturskolan waa 300 kr, haddii qofku leeyahay dhowr ilmood lacagta ugu badan waa 500 kr qoyskiiba.

Waxaan sidoo kale leenahay hawlo sawirro iyo filimo soo saarid ee qolka wax lagu hindiso ee SPACET, ku yaal Korsåsliden 33. Wixii warbixin intaa dheer waxaa laga helayaa boggeena internetka. Soo dhawaada!

Cinwaan: Korsåsliden 33
Västra Frölunda

Maxadada: Briljantgatan

Telefoon: 031-366 44 80
Talaado- jamce saacadaha 10-12
Isniiin- jamce saacadaha 14-16

E-mail:
kulturskolan@vastra.goteborg.se

Bogga internetka: [goteborg.se/
kulturskolanvastragoteborg](http://goteborg.se/kulturskolanvastragoteborg)

Bogga internetka: [goteborg.se/
instrumentforradet](http://goteborg.se/instrumentforradet)



Casharro ka caawin

Waxaa Göteborg ku yaal dhowr mactabado buugaag oo casharrada iskuulka lagaga caawin karo. Kuwa kaa caawinaya casharrada waxay noqon karaan arday kale, is xilqaa-mayaal ka socda ururo kale ama shaqaalahaa mactabada buugaagta. Waxaa casharro ka caawinta loogu talogalay adiga adigoo qof wayn ah waxbarta, adiga dhigta dugsiga hoose dhexe ama dugsiga sare. Kalendariet baad ka arki kartaa mactabadaha buugaagta casharra-da lagaga caawin karo.

Bogga internetka:
kalendarium.goteborg.se

Maktabadda buugaagta

Da' kasta

Maktabadaha buugaagta waxaa adiga wayn iyo ilmuu ka amaan-han kartaan buugaag, buugaag la dhagaysto, filimo iyo ciyaarta tv-ga lagu ciyaaro. Waxed heli kartaa talo ku saabsan buugaagta kor loo akhrin karo. Waxed sidoo kale akhrin kartaa wargaysyo iyo joornalo ama amaahan kartaa kom-buyuutar. Maktabadaha buugaagta ugu badan waxay leeyihiiin wifi bilaash ah.

Bogga internetka:
goteborg.se/bibliotek

Maktabadda buugaagta Frölunda

Maktabadda buugaagta Frölunda waxay ku dhextaal Kulturhus. Hal-kaan waxyaa ka helaysaa buugaag loogu talogalay da 'o kala duwan iyo luuqado kala duwan. Waxaa jira sheekoooyin aad ku indho-sarcaa-dasid, cabsi badan iyo sheekoooyin macaan oo kicinaya niyadda aad adiga iyo ilmahaagu u haysaan wax akhriska.

Äppelrummet waxaa yaal qalab warbaahin loogu talogalay car-ruurta iyo dhalinyarada oo indha-ha, dhagaha iyo faraha fiintooda lagu akhriyo. Waxed halkaan ka helaysaa waxyaalo xaqiiqo ah oo ku saabsan awoodaha lixaadeed ee aadamigu ku kala duwan yahay. Maktabadda buugaagta qof kasta wuxuu ka heli karaa sheekoooyin uu iska dhex arko.

Maktabadda buugaagta waxay soo qabanqaabisaa hawlo firfircooni loogu talogalay waalidiinta iyo carruurta, wax kasta laga bilaabo kulamo luuqadda iswiidishka lagu wada barbaranayo iyo cashar jee-din ku saabsan waalidnimada illaa laga gaarayo muusiig iyo heeso loogu talogalay carruurta yaryar. Kusoo dhawow!

Cinwaan: Valthornsgatan 13
Västra Frölunda

Maxadada: Frölunda torg

Telefoon: 031-366 28 40

E-mail: frolunda.bibliotek@kultur.goteborg.se

Bogga internetka:
goteborg.se/frolundabibliotek

Maktabadda buugaagta Södra skärgården

Styrsö iyo Donsö labadaba waxaa ku yaal mactabado buugaag. Styrsö mactabadeeda waxaa yaal kombuyuutar aad isticmaali kartid, oo labada mactabadoodba waxaad ka helaysaa buugaag xiise badan oo adiga iyo ilmahaagu aad akhrisan kartaan. Waxaa sidoo kale lagaa caawinayaa inaad isticmaashid adeegyada kombuyutarka maktabadda buuugaagta. Waxaad ka helaysaa wakhtiyada aan furanahay boggeena internetka.

Bogga internetka:
[goteborg.se/
sodraskargardensbibliotek](http://goteborg.se/sodraskargardensbibliotek)



Maktabadda buugaagta Styrsö

Cinwaan: Brattenskogen 82, Styrsö

Telefoon: 031-366 57 80

E-mail: [sodra.skargardens.
bibliotek@kultur.goteborg.se](mailto:sodra.skargardens.bibliotek@kultur.goteborg.se)

Maktabadda buugaagta Donsö

Cinwaan: Grådalsvägen 20, Donsö

Telefoon: 031-366 57 82

E-mail: [sodra.skargardens.
bibliotek@kultur.goteborg.se](mailto:sodra.skargardens.bibliotek@kultur.goteborg.se)

Basaska buugaagta

Basaska buugaagta waxay booqdaan dugsiyada xannaanada asbuucii mar oo markaas waxay ku cabbaysan yihiin buugaag badan iyo sheekooyin badan. Waxaa jira sidoo kale muusiig iyo joornaalo la amaahan karo. Wixii kulaylahaa 2020 ka danbeeya waxay Göteborg helaysaa labo bas oo cusub oo ku shaqeeyaa koronto kuwaas oo waxyalo badan oo dheeri ah u haya adiga da'daadu tahay 0-13.

E-mail: bokbuss@kultur.goteborg.se

Bogga internetka:
goteborg.se/bokbussen



Ururo

Da' kasta

Waaxda degmada waxa ka jira ururo dhowr ah oo hawlo kala duwan ka shaqeeya, tusaale ahaan isboorti, aalmiito, dhaqan iyo muusiig. Ma rabtaa inaad la xiriirtid urur ama bilowdid urur cusub ama iskaashi cusub? Lasoo xiriir oo usoo sheeg fikradahaaga la taliyaha ururada. Waxaa sidoo kale taageero u codsan kartaa ururkaaga.

Cinwaan: Trollbärvägen 18A, Västra Frölunda

Telefoon: 031-366 41 70

E-mail: foreningsstod@vastra.goteborg.se

Bogga internetka: [goteborg.se/wps/portal/start/kultur-och-fritid/
bidrag--stipendier--foreningar](http://goteborg.se/wps/portal/start/kultur-och-fritid/bidrag--stipendier--foreningar)

Qabso lookaal

Waxaa Göteborg ku yaal hoolal isboorti iyo hoolal jimicsi oo aad shaqsi ahaan, urur ahaan ama koox ahaan qabsan kartid oo u isticmaali kartid isboorti ama munaasabdo kale. Waxaad ka qabsan kartaa bogga internetka.

Telefoon: 031-368 20 00

E-mail: kundservice@ioff.goteborg.se

Bogga internetka: bok.goteborg.se

Frölunda fritidsbank

- Amaaho qalabka xilliga firaaqada

Da' kasta

Waxaad Fritidsbanken ee ku taal Frölunda torg ka amaahan kartaa qalab isboorti iyo qalabka isboortig iyo xilliga firaaqada. Waxaad sidoo kale keeni kartaa qalabka aadan u baahnayn inaad sii isticmaashid. Dadka oo dhan way amaahan karaan oo wax kasta waa bilaash. Dib u isticmaalidda alaabta bey' adda bay u fiican tahay.

Cinwaan: Frölunda torg köpcentrum, vid Servicekontoret och Frölunda lilla saluhall

Maxadada: Frölunda torg

Bogga internetka: fritidsbanken.se

ka raadi Hitta din fritidsbank

Aalmiito, jimicsi iyo dabaal

Waddo lagu aalmiiteeyo

Göteborg waxaa ku yaal waddooyin lagu aalmiiteeyo, oo ay ka mid yihiin Ruddalen iyo Påvelund. Wuxaaad wixii warbixin intaa dheer oo ku saabsan waddooyinka lagu aalmiiteeyo iyo kuwo kale oo Göteborg ku yaal ka helaysaa:
goteborg.se/motionsspar

Ruddalen

Ruddalen waa deegaan cagaar ah jidad dabiici ah leh. Halkaan waxaa ku yaal meelo lagu aalmiiteeyo 2,2 kilomitir ah, oo ay ku wareegsan yihiin dhagxaan buureed iyo duur leh geed caleen dhuudhuuban oo "tall" la dhaho. Halkaan waxaa ku yaal xarunta isboortiga Ruddalen oo leh jimicsi (jiim), garoon kabaha barafka lagu la socdo, garoomo banooni iyo jimicsi bannaanka ku yaal. Waxaa sidoo kale aagga ku yaal meel daawasho qurxoon iyo diffaac qalcad taariikh hore ka haray.

Maxadada: Fyrktorget, Musikvägen och Kavåsvägen

Xarunta aalmiitada Påvelund

Xarunta aalmiitada Påvelund waxaa ku yaal jiim yar. Waxaa sidoo kale xarunta aalmiitada ku dheggan degaan dabiici ah oo hawo lagu soo qaato halkaas oo aad kusoo lugayn kartid ama kusoo ordi kartid waddooyinka aalmiitada oo dherarkoodu kala duwan yahay – ka bilowda 1,7 kilomitir (waddo iftiin koronto leh) illaa 6,2 kilomitir.

Xarunta aalmiitada Påvelund waxaa maamula kooxda kubadda gacanta Önnered.

Maxadada: Tranered

Cinwaan: Redegatan 18
Västra Frölunda

Jimicsi (Jiim) bannaanka ku yaal

Galbeedka Göteborg gudaheeda iyo hareeraheeda waxaa ku yaal jimicsiyo bannaanka ku yaal oo loogu talogalay adiga jecel inaad mashiino ku tababaratiid bannaanka. Mashiinada waa ku kuwo ay sahlan tahay in la isticmaalo oo badanaa waxaad ku tababaranaysaa adigoo adeegsanaya miisaanka jirkaaga. Jimicsiga bannaanka wuxuu leeyahay badanaa tilmaamo la raacayo sida aad u samayn kartid jimicsiyada kala duwan.

- » Bergkristallparken
- » Kastanjeallén
- » Melongatan
- » Ruddalen
- » Tenneskärsgatan

Warbixin ku saabsan Göteborgs Stad jimicsyadeeda bannaanka iyo khariidooyinka lagu soo helayo waxaad ka helaysaa bogga internetka.

Telefoon: 031-365 00 00
(Göteborgs Stads kontaktcenter)

Bogga internetka:
goteborg.se/utegym

Parkour wuxuu ku yaal Positivparken

Waxaad Positivparken, oo ku yaalla Frölunda kulturhus, ku tijaabin kartaa parkour. Waa hab jimicsi la jecelyahay oo jirka lagu tababarayo oo miskaxda lagu carbiyo iyadoo la boodayo, la dilindilleeyo oo caqabado dabiici ah looga tillaabayo qaabab kala duwan iyadoo aan la isticmaalin qalab caawineed.

Maxadada: Frölunda torg

Bogga intenetka:
goteborg.se/utflyktslekplatser
(Dooroo Positivparken)

Ku socosho kabaha barafka

Waxaad xarunta isboortiga Ruddalen ku socon karta kabaha barafka. Waxaa halkaan ku yaal garoonka ciyaarta xeegada barafka oo dhusha ka xiran laakiin usha xeegada lagu ciyaaro lama oggola. Waxaa sidoo kale meesha laga amaahan karaa kabaha barafka lagu la socdo.

Cinwaan: Musikvägen 55

Maxadada: Musikvägen

Telefoon: 031-368 20 70

Bogga internetka:
goteborg.se/ruddalen

Bergkristallparken

Waxaad halkaan ka helaysaa meel cabbirkeedu yahay 460 mitir isku wareeg shub ah halkaas oo aad ku isticmaali kartid bahala shaagagga leh ee lagu socdo (skejtboard), baaskiilka istaagga lagu riixo (kickbike), baaskiilka BMX iyo kabaha shaagagga leh.

Bergkristallparken waxaa ku yaal meel kubadda kolayga lagu ciyaaro, garoon kubbadeed iyo garoon kuu-laha "boule" lagu ciyaaro.

Cinwaan: Bergkristallparken 1

Maxadada: Beryllgatan
Bergkristallsgatan

Bogga internetka: [goteborg.se/
wps/portal/enhetssida/fritid-
vastra-goteborg/bergkristallparken](http://goteborg.se/wps/portal/enhetssida/fritid-vastra-goteborg/bergkristallparken)

Dabaal guriga gudihiiisa ah

Dhammaan carruurta da'doodu u dhexayso 0-5 sano ee Göteborg ku nool bilaash bay dabaashu u tahay. Kuwa da'doodu u dhexayso 6-17 sano waxay kusoo galaan khidmad 35 kronor ah. Ma danaynasaan iskuul dabaal oo aad ilmahaaga u rabtid waxaad la hadli kartaa meesha dabaasha kugu dhow iyagaa ku caawinaya.

Dabaasha Frölundababet

Dabaasha Frölundababet waxay ku dhextaal Frölunda Kulturhus. Halkaan waxaa ku yaal dabaal 25 mitir ah, bahasha carruurtu kasoo taraaraxaan, meel laga soo boodo, meel dabaasha sare lagaga soo boodo, biyo dabaasha lagu barto, biyo cagaha lala galoo iyo baastuuga la isku kululeeyo.

Halkaan wuxuu ilmahaaga yar ku dabaalan karaa dabaal ilmood, Waxaa jira iskuul dabaal loogu talogalay dadka waawayn iyo carruurta, waad ku ciyaari kartaan oo tijaabin kartaan inaad biyaha ku wada tababarataan.

Waxaad sidoo kale hoolka dabaasha u kiraysan kartaa xaflad carruureed. Wakhiyada ay furan tahay, qiimaha iyo warbixin kale waxay ku jiraan bogga internetka.

Cinwaan: Valthornsgatan 13
Västra Frölunda

Maxadada: Frölunda torg

Telefoon: 031-368 22 80

E-mail: badkassan.frolundababet@ioff.goteborg.se

Bogga internetka:
goteborg.se/frolundababet

Ku dabaalo bannaanka

Wareegga xeebta iyo jasiiradaha Göteborg waxaa ku yaal meelo badda lagu dabaasho oo wacan. Waxaa jira warbixin ku saabsan dabaasha bannaanka ee Göteborg oo ku jirta goteborg.se/hittabad iyo app-ka Badplatsen (App Store, Google Play).

Waxaan halkaan uga hadlanaa dhowr meelo dabaal oo ku wareegsan xeebta ku taal magaalada qaybteeda koonfur galbeed, laga soo bilaabo Röda Sten dhanka waqooyi ku taalla illaa Välen oo dhanka koonfureed ku taalla. Waxaa yaalla qalab nolosha lagu badbaadiyo dhammaan goobaha dabaasha aan sheegnay.

Kulaylaho gudhiisa waxaa la cabbi-raa heerkulka biyaha lagu dabaasho maalin kasta. Waxaad ka heli kartaa heerkulka biyaha dabaasha markaa la joogo app-ka *Badplatsen* iyo badplatsappen.se.

Xilliga dabaasha gudhiisa musqu-laha ku yaal goobaha dabaasha way furan yihiin maalin kasta. Wixii warbixin intaa dheer waxaad ka

helaysaa mid kasta oo ka mid ah goobaha dabaasha hoos ku yaal.

Svenska Livräddningssällskapet Göteborg waxay soo qabanqaabiy-aan iskuullo dabaal oo ka jira dhowr meelood oo lagu dabaasho kulayla-ha gudhiisa. Wuxaa warbixin intaa dheer ka helaysaa slsgoteborg.se.

Bogga internetka:

goteborg.se/hittabadslsgoteborg.se
(Svenska Livräddningssällskapet Göteborg)

App: Badplatsen (App Store, Google Play, badplatsappen.se)

Dabaasha Aspholme ns badplats (Saltholmen)

Goobta dabaasha Aspholmens badplats waxaa kasoo dabaakan kartaa buuraha yaryar ee badda ama waxaad kaashan kartaa jarjan-jarooyinka dabaasha. Dukaan sondaqad ah baa ku yaal maxadada.

Qalab: Jaranjarooyin dabaal, musqulo meelaha hawada lagu qaato ku yaal – way furnaan doonaan 15 meey-15 septembar

Maxadada: Saltholmen. Marka laga yimaado maxadada waxay meesha dabaasha u jirtaa 500 mitir.

Goobta dabaasha Fiskebäck

Goobta dabaashu waxay u dhow-dahay dekadda doomaha yaryar ee Fiskebäck. Wixaad halkaan ka heli kartaa buuro yaryar oo meesha dabaasha ku yaal, haddii aadan doorbidayn xeebta ama kaabadda. Maqaaxi qaxwe iyo dukaan sandaqad ah baa ku yaal.

Masoo kaxeysan kartid Eey inta u dhexaysa 1 meey illaa 15 sebtembar.

Qalab: kaabad, jaranjarooyin dabaasha loo qaato, goob wax lagu dubto, goob ciyaar, musqulo. Musquluhu waxay furan yihii Saacadaha kl. 8.30–22 Muddada la dabaasho gudaheeda

Maxadada: Fiskebäcks småbåtshamn. Marka laga yimaado maxadda meesha dabaashu waxay u jirtaa 300 oo mitir.

Goobta dabaasha Ganlet

Halkaan waxay ilmaha yaryar ku dabaalan karaan xeebta yartaa oo ilmaha waawayna waxay ku dabaa-lan karaan iyagoo kasoo boodaya buuraha yaryar ee biyaha dabaasha iyo jaranjarooyin dabaal. Aagu wuxuu kusoo xusuusinayaa sidii dhulka dabiiciga ah horay u ahaan jiray waxay leedahay dhul daaqsin ah, dhul xeebeed doog ah, dhul biyo qabad leh iyo gaballo buuro ah.

Marka laga yimaado maxadada oo meesha dabaasha loo socdo waxaa lagu sii lugaynayaa meal qurxoon.

Qalab: jaranjaro dabaal, musqulo bannaanka ku yaal – waxay furan yihii habeen iyo maalin qiyastii 15 meey–15 septembar

Maxadada: Halleskärsgatan. Marka laga yimaado maxadada 800 mitir bay meesha dabaashu u jirtaa

Dabaasha Näsetbadet

Dabaal aad caan u ah oo leh ciid xeebeed saldheer oo ay ku wareegsan yihii buuro yaryar. Halkaan waxaa ku yaal shaag shub ah oo lagu qorraxysto oo leh kaabad iyo jaranjarooyin dabaal. Waxaa jira sidoo kale dukaan sandaqad ah iyo meel cunto lagu iibiyo. Ma la oggola inaad eygaaga usoo kaxaysatid Näset inta u dhexaysa 1 meey iyo 15 sebtembar.

Qalab: kaabad, jaranjarooyin dabaal, wiifowyo, musqulo. Musqulaha waxay furan yihii muddada la dabaasho, saacadaha 08.30–22. Musqul la waafajiyay baahida dadka naafada ahna way ku taal. Waxay furan tahay habeen iyo maalin.

Maxadada: Näsbovägen. Marka laga yimaado maxadada waxay meesha dabaashu u jirtaa 400 oo mitir.

Smithska udden

Dabaasha jannada ah waxay reer Göteborg ugu wacaan Smitten. Halkaan dad badan baa boos uga bannaan yahay buuraha yaryar ee biyaha dabaasha, xeebaha iyo meelo caws ah. Dhanka koonfur galbeed ee "Smitten" waxaa ku dabaasha dad badan oo qaawan.

Qalab: kaabadyo, jarjanjarooyin dabaal, goob ciyaar, dukaan sandaqad ah, musqlu. Musquluuhu way furan yihiin muddada lagu jiro xilliga dabaasha, saacadaha 08.30–16.30. Waxaa jirta musqlu dadka naafadaha ah baahidooda la waafajiyay (ay geli karaan) waxay furan tahay habeen iyo maalin.

Maxadada: Näsbovägen. Marka laga yimaado maxadada meesha dabaashu waxay u jirtaa 1,3 kilomitir.

Dabaasha Styrsö Bratten

Kasoo dabaalo xeebta ama kaabadda, qiyaastii 100 mitir keliya bay u jirtaa meesha doonyuhu ka baxaan halka dukaanka sandaqadda ah ku yaal iyo meesha cuntada laga iibsado.

Ka taxadar –biyuhu awood bay ku leeyihii meesha doomuhu maraan!

Qalab: kaabad, jarjanjarooyin dabaal, musqlu dadka naafada ah baahidooda la waafajiyay oo muddada xilliga dabaasha furan, saacadaha 07–22.


Maxadada : Styrsö Bratten (doon). Marka laga yimaado maxadada meesha dabaashu waxay u jirtaa 300

Meesha dabaasha Styrsö Utterviks badplats

Waa aag qabow laakiin ubax badan. Halkaan waxaa ku taal xeeb yar oo loogu talogalay ilmaha yaryar iyo kaabad iyo jarjanjarooyin dabaal loogu talogalay ilmaha waawayn.

Qalab: jarjanjarooyin dabaal, shaag kaabad ah, saddex musqulood oo bannaanka ah, oo mid ka mid ah dadka naafada ah baahidooda la waafajiyay, waxay furan yihiin habeen iyo maalin qiyaastii 15 meey– 15 sebtembar

Maxadada: Styrsö Tången (doonta la raaco). Maxadada marka laga yimaado meesha dabaashu waxay u jirtaa 1,2 kilomitir.



Soo arag deegaan dabiici

Galbeedka Göteborg gudaheeda, laga soo bilaabo Röda Sten oo dhanka waqooyi ku taalla illaa Välen oo dhanka koonfureed ku taalla, waxaa ku yaal deegaan dabiici ah oo kala duwan oo lasoo arki karo. Waxedaad halkaan ka helaysaa duur, meelo xaddiiqado ah, buuro badeed, dhul doog ah iyo xeebo loogu talogalay soo lugayn, lagu nastro, la tafo, cunto lagu dubto ama lagu ciyaaro. Boggeena internetka baad ka helaysaa warbixin ku saabsan deegaannada dabiiciga ah ee Göteborg ku yaal.

Bogga internetka: goteborg.se/naturomraden

Buurta Skärvallsberget

Socod dhererkiisu yahay 4,5 km baa looga yimaada Hinsholmen oo lagu tagaa kaabadda Önnered ee ku taal dhanka koonfureed, waxaad jidka kusii dhaafaysaa buuro, dariiqyo duurka dhexmara, gacan biyood lagu dabbaasho iyo dekad-do doomo. Marka laga yimaado Hinsholmen dekaddeeda dooma-ha yaryar, taasoo horay u ahaan jirtay dhul hawada lagu qaato illaa laga soo gaarayay 50-meeeyadii, waxaa ku taal jarjanjaro tagta dariiq buurta Skärvallsberget dhexmara.

Buurta dusheeda waxaa si wacan looga daawan karaa jasiiradaha koonfureed (södra skärgården) ee qurxoon. Dillaacyada buurta dhex-deeda ah waxaa ku yaal Lindalen iyo markii hoos loo daadago oo ay ku yaalliiin gacan badeedyo yaryar. Waxaa xeebta ku wareegsan biyo laga kalluumaysto oo wacan.

Maxadooyinka: Hinsholmen. Marka laga yimaado maxadada waxay buurta u jirtaa 1,6 km. Dekadda doomaha yaryar ee Fiskebäck. Marka laga yimaado maxadada waxay qiyaastii 160 mitir u jirtaa buurta.

Välen

Välen waa dhul dhabiici ah oo la xafiday (seero) oo taariikh qani ah leh. Raac dariiqa dabiiciga ah oo kusoo wareeg dhul taariikh wakhtigaan la joogo iyo taariikh hore labadaba leh.

Välen waxay leedahay xusuuso hore oo ka yimid waaye hore iyo minnaaradda shimbirta (fågeltornet) oo aad ku arki kartid shimbiraha "beckasiner", garafaa iyo "vadarfåglar". Minnaaradda shimbirta (fågeltornet) waxay leedahay meel lala mari karo kursiga curyaanka iyo gaariga ilmaha lagu riixo. Lo' isirkeedu kasoo jeeda Skotland oo buuraha ku nool baa daaqasa dhulkaa doogga ah.

Maxadada: Kannebäck. Maxadadu waxay ku taal Välens fågeltorn.

Xaddiiqada Ängholmsparken

Xaddiiqada Ängholmsparken waxay u dhexaysaa Långeholm iyo Saltholmen oo waxay leedahay geedo badan oo qurxoon sida "lind" (geed udgoon), "Kastanj" (geed miro leh) iyo "alm" (geed caleemo waawayn). Halkaan waxaa ku yaal garoon tennis loogu talo-galay bulshada.

Maxadada: Roddföreningen. Marka laga yimaado maxadada waxay xadliiqadu u jirtaa 100 mitir.

Öppna förskolor

0-6 sano

Öppna förskolan waa bar kulan loogu talogalay qoysaska leh carruurta da' doodu u dhexayso eber illaa lix sano. Waa bilaash in lasoo booqdo "öppna förskolor" umana aad baahnid inaad horay usoo sheegtid.

Bogga internetka:
goteborg.se/oppnforskola

Öppna förskolan Västra Göteborg

Öppna förskolan wuxuu adiga iyo ilmahaaga u fidinayaan hawlo waxbarid oo leh kulamo xiise badan oo ka dhacaya bey'ad la isku aamini karo, halkaas oo ciyaar, wax hindisid, heeso iyo wada hadal la isku dhex wado. Innagoo adiga kula kaashanayna baan waxaan ilmahaaga baranaa waxyaalo xiise leh, luuqad ahaan iyo bulsheey ahaan labadaba iyadoo uu waxbaridaas hagayo shaqaale macalinimo soo bartay.

Adigaa dooranaya marka iyo inta jeer ee adiga iyo ilmahaagu nasoo booqanaysaan. Waxay sidoo kale shaqaaluhu kaa taageeri karaan waalidnimada haddii aad qabtid su'aalo ama fikrado. Wuxaad halkaan la wadaagi kartaa talooyin, fikrado oo arrimaha nololmaal-meedka ku saabsan oo la falanqayn

kartaa waalidiinta ilmaha yaryar ee xaaladaada oo kale ku sugar.

Öppna förskolan wuxuu bixiyaa koorsooyin loogu diyaargaroobayo SFI, kulamo waalidiin soomaali ah, masaajo ilmaha yaryar iyo kulamo mawduucyo laga hadlo.

Cinwaan: Grevegårdgatan 198 F

Maxadada: Smaragdgatan

Telefoon: 031-366 47 03

E-mail: oppna.forskolan@vastra.goteborg.se

Bogga internetka: [goteborg.se/wps/portal/enhetssida/oppna-forskolan-i-vastra-goteborg](http://wps/portal/enhetssida/oppna-forskolan-i-vastra-goteborg)



Kaniisadda Iswiidhan öppna förskolor

Kaniisadda Iswiidhan waxay öppna förskolor ku leedahay Furåsen, Tynnered, Näset, Västra Frölunda iyo Styrsö. Hawlahaas waxay u furan yihiin waalidiinta iyo carruurta yaryar. Carruur da'o kala duwan leh baa imaan kara meelo kala duwan, gal bogga internetka oo ka arag wixii warbixin intaa dheer. Soo dhawaada!

Bogga internetka: svenskakyrkan.se/vastra-frolunda-pastorat/barnverksamheter

Dugsiga xannaanada

1–5 sano

Dugsiga xannaanada waxaa loogu talgalay carruurta laga soo bilaabo da’da hal sano illaa ilmuu ka buuxinayo lix sano.

Waxaa ilmahaagu ku baranayaa waxyaalo cusub oo horumar samaynayaa isagoo/iyadoo u maraya ciyaar, wax hindisid oo iskiis wax u baarbaaro, koox ahaan iyo si wadajir u wada sameeyaan dad waawayn. Waxbarashada dugsiga xannaanadu waxay aasaas u tahay waxbarasho nolosha oo dhan soconaysa. Dugsiga xannaanada waxbarashadiisa waxaa ka mid ah in ilmaha la xiiise geliyo oo la xujeeyo iyadoo laga duulayo hadafyada manhajka waxbarasho.

Xilli dugsiyeedka dayrta sannadka ilmuu 6 sano buuxsho waxaa u bilaabanaya iskuul. Ilmuu wuxuu bilaabayaa markaas fasalka leyliga (ebraad).

In la codsado dugsi xannaano

Waxaad booska dugsiga xannaanada codsan kartaa ugu horrayn lix bilood ka hor marka ilmahaagu booska u baahan yahay. Ilmuu wuxuu boos heli karaa ugu horrayn marka aw sannad buuxsho.

Waxaad dooran kartaa shan dugsi xannaano oo kala duwan markii aad codsanaysid. Illaa laga gaarayo marka booska lagugu soo casumo, waxaad la xiriiri kartaa adeegga dugsiga xannaanada si aad wax uga beddeshid doorashadaada adigoo booskaagii sii haysta.

Waxaad halkaan ka helaysaa warbixin intaa dheer oo ku saabsan bilaabidda dugsiga xannaanada, dugsiyada xannaanada kala duwan iyo codsiga laga gudbisto bogga internetka.

Bogga internetka:
goteborg.se/forskola

Iskuul

6–15 sano jir

Dhammaan carruurta Iswiidhan ku nool waxaa khasab ku ah inay 10 sano iskuul dhigtaan. Waxaa loogu yeeraa ku waajibidda iskuul. Ku waajibidda iskuul waxay qusaysaa laga soo bilaabo xilli dugsiyeedka dayrta sannadka ilmuu lix sano buuxsho. Markaas waa in ilmuu bilaabo fasalka leyliga (ebraad). Wixii ka danbeeyaa fasalka leyliga waa in ilmuu bilaabo dugsiga hoose dhexe fasallada 1–9. Waxaa jira sidoo kale dugsiga hoose dhexe ee ardayda baahida gaarka ah leh. Kaas waxaa quseeya shuruuc kale.

Sannad dugsiyeedka kasta wuxuu leeyahay xilli dugsiyeed dayreed iyo xilli dugsiyeed gu'. Waxaa jira qorsheyaal loogu talogalay ardayda oo ku aadan waxyaalah loogu talogalay inay ardaydu iskuulka ku bartaan, waxaa la dhahaa qors-hayaasha koorsooyinka iyo man-hajyada waxbarasho. Iskuulku waa bilaash.

Meesha xilliga ilmuu iskuulka fasaxa ka yihiin lagu hayo iyo qoyska ilmaha guriga ku haya waxaa loogu talogalay ardayda iskuulka dhigta. Halkaan wuxuu ilmahaagu joogi karaa iskuulka ka hor iyo kaddib, illaa ilmuu ka buuxinayo saddex

iyo tobani sano. Waa ilmo leh waali-diin shaqeeya ama waxbarta kuwa gacanta koowaad boos laga siiyo.

Wixii intaa dheer oo ku saabsan iskuulka iyo meesha xilliga ilmuu ay fasaxa yihiin lagu hayo waxaad kasii akhrin kartaa:

goteborg.se/grundskola

In iskuul la codsado

Dhammaan carruurta ka diiwaan gashan Göteborg waxaa loo dammaanad qaaday inay boos ka he-laan mid ka mid ah iskuulladeena. Adiga waalidka ah waxaad codsan kartaa iskuulka aad doonaysid inuu ilmahaagu dhigto. Taasi waxay qusaysaa laga soo bilaabo dugsiga xanhaanada illaa laga gaarayo fasalka 9aad.

Ma jiraan safaf loo galo iskuullada degmada Göteborgs Stad. Haddii dad badan soo codsadaan hal iskuul oo aan boos loo wada heli karin waxaa degmada Göteborgs Stad uga yaal shuruuc ardayga booska xaqqa u yeelanaya.

Waxaad goteborg.se/grundskola ka codsan kartaa boos iskuul degmada hoostaga oo ka akhrin kartaa sida shuruucda meelayntu yihiin. Haddii aad rabtid inaad codsatid iskuul madax bannaan waxaad si toos ah ula xiriiraysaa iskuulkaas. Haddii aadan codsi u dirin oo aadan u dooran ilmahaaga iskuul waxaa boos laga siinayaan iskuul guriga u dhow.

Taageerada (caawinta) iskuulka gudihiisa

Iskuulka kasta waxaa jooga koox caafimaadka ardayda qaabilsan oo shaqadoodu tahay inay maamulaha iyo iskuulka ka taageeraan shaqada lagu horumarinayo dhammaan ardayda si ay u gaaraan hadafyada waxbarasho. Kooxdha caafimaadka ardayda qaabilsan waxay ka kooaban yihiin macalin ku takhasusay waxbaridda ardayda caawinaadda gaarka ah u baahan, caafimaad (kalkaaliso & dhakhtar), dad qaanbilsan wixii xag nafsiyadeed iyo xag bulsho ku saabsan iyo wixii cilmi nafsi ah. Iskuullada badankoda waxaa ka jira koox ka kooban maamule, macalin ku takhasusay waxbaridda ardayda caawinaadda gaarka ah u baahan, la taliye, kalkaaliso iskuul, dhakhtar iskuul iyo qof cilmi nafsiga bartay.

Wixii warbixin intaa dheer oo ku saabsan iskuulka, meesha ilmaha lagu hayo marka ay iskuulka fasaxa ka yihiin, in la codsado iskuul iyo taageerada iskuulka gudihiisa ah waxaad ka heli kartaa bogga internetka: goteborg.se/grundskola

Codso shaqo kulayle

Adiga dhigta fasalka 9aad waxaad cadsan kartaa shaqo kulayle. Wixii warbixin intaa dheer oo ku saabsan shaqo kulayle oo Göteborgs Stad gudaheeda ah waxaad ka helaysaa bogga internetka goteborg.se/sommarjobb. Bogga waxaa sidoo kale ku jira meelaha laga la xiriiri karo haddii aad qabtid wax su'aal ama aragtiyo ah oo ku saabsan shaqada kulaylaha.

Bogga internetka:
goteborg.se/sommarjobb



Talo iyo taageero ku socota waalidiinta, da' yarta iyo carruurta

Halkaan waxaad ka helaysaa talooyin iyo caawinaad aad u baahan kartaan adiga iyo ilmahaagu. Dhammaan qoysaska oo dhan way kala duwan yihii oo sidaas darteed waxaa jira taageero kala duwan oo ay heli karaan. Haddii aad u aragtid inay adag tahay in meel sax aad ku hagaagtid waxaad wici kartaa mid ka mid ah hawladeenada hoose, markaas waxay kugu caawinayaan inay meel sax kugu hagaajiyaan.

Taageero waalid

Loogu talogalay adiga leh carruur 3-18 sano jira

Ma rabtaa inaad la kulantid waalidi-in kale oo ka hadashid waalidnimada? Waalidnimada waxaa ka buuxa mawduucyo farxad leh laakiin sidoo kale waxay leedahay caqabado.

Idinka waalidiin u ah 3-18 sano jirro waxaan si diirran idin kusoo dhawaynanaa kulamo waalidiin. Halkaan waxbaa la falanqeeyaa, filimo iyo leyliyo ku salaysan cilmi-baarlis ku saabsan waalidnimada iyo horumarka ilmaha.

Waxbarashooyinka waalidiinta waa bilaash oo waxaa loogu yeeraa ABC (dhammaan ilmuu qadarin bay mudan yihii) iyo LFT (taba-

bar hoggaamineed loogu talo-galay waalidiinta dhowr iyo toban jirrada). Waxed warbixin intaa dheer oo ku saabsan kulamada ka helaysaa bogga internetka. Waxed noola soo xiriiri kartaa si toos ah haddii aad rabtid inaad koorsooyinka wax kasii ogaatid.

ABC

Telefoon: 031-366 47 48

E-mail: foraldrastodigruppabc@vastra.goteborg.se

LFT

Telefoon: 031-366 41 71

E-mail: foraldrastodigrupplft@vastra.goteborg.se

Bogga internetka: goteborg.se/
foraldrastodvastragoteborg

Talobixin qoys

Lammaaneyaaasha iyo qoysaska raba inuu xiriirkeedu sii fiicnaado ama raba inay xiriirkooda soo afja-raan waxay la xiriiri karaan Göte-borgs Stad (degmada Göteborg) si ay u helaan caawinaad iyo taage-ero. Dhammaan dadka ka shaqeeya talobixinta qoysaska waxaa saaran waajib sir xajin waxna ma diiwaang-eliyaan. Idinka soo codsanaya waad qarin kartaan dadka aad tiihiin.

Cinwaanka booqashada:

Kronhusgatan 2 F Göteborg

Maxadada:

Brunnsparken

Telefoon:

031-367 93 63

Xeerka qoyska

Haddii aad tiihin waalidiin oo aad kala tagteen waxaad la kulmi kartaa caqabado marka laga hadlayo mas'uuliyadda iyo daryeelka ilmaha, meesha ilmuu degayo iyo inta jeer aad ilmaha la kulmasaan. Xafiiska xeerka qoyska (Familjerättsbyrån) waxay idinku caawin karaan wada hadal idin dhixmara oo aad uga wada shaqaysaan waa ilmaha u dan-ta ah. Haddii aad ku heshiisaan wax-aad saxiixi kartaan heshiis quseeya mas'uuliyadda iyo daryeelka ilmaha, meesha ay deggayaan iyo la kulmi-dooda sharchiyan ka waajibaysa.

Cinwaan: Familjerättsbyrån, Olof Palmes Plats 1, Göteborg

Maxadada: Järntorget

Telefoon: 031-367 92 00

E-mail: familjeratten@socialresurs.goteborg.se

Xafiiska adeegga bulshada Galbeedka Göteborg

Laanta carruurta iyo dhalinyarada Barn- och ungdomsenheten

Laanta carruurta iyo dhalinyarada waxaa adiga waalidka ah ka heli kartaa talooyin iyo taageerooyin kala duwan. Waxaad soo codsan kartaa caawinaad (taageero) aad adiga iyo ilmahaagu heshaan.

Xafiiska adeegga bulshada wux-uu sidoo kale ka shaqeeyaa inuu diffaaco oo taageero carruurta iyo dhalinyarada oo waxay baaraan dacwadaha ka yimaada hey'adaha kale iyo shaqsiyaadka.

Lasoo xiriir kooxdeena qaabilaadda haddii aad su'aalo, fikarro xaaladii-na ku saabsan qabtid ama aad soo codsanaysid caawinaad. Kooxda qaabilaadda waxaad telefoonkooda ka heli kartaa maalin kasta oo sha-qo inta u dhexaysa saacadaha 8 iyo 16, talaadooyinka illaa saacadda 18.

Cinwaan: Topasgatan 58
421 48 Västra Frölunda

Maxadada: Frölunda torg

Telefoon: 031-366 41 02

Xafiiska adeegga bulshada Göteborgs Stad ee heeganka ah

Xafiiska adeegga bulshada heeganka ah waxaad ka heli kartaa caawinaad fiidadka, habeenada iyo maalmaha fasaxa ah. Waxay noqon kartaa wax ku saabsan xoog adeegsi, Wax si xun u isticmaalid, meel la dego ama haddii aad ka shakidid inuu qof khatar ku jiro.

Cinwaan: Stora Badhusgatan 14
Göteborg

Maxadada: Stenpiren

Telefoon: 031-365 87 00

Bogga internetka:
goteborg.se/socialjouren

Taageero ehel

Loogu talogalay adiga jira 18 sano iyo ka wayn

Adiga taageeraya qof ehel ah laftigaaga baa taageero u baahan kara. Da' da qofka aad ehelka tiihin wax micne ah ma samaynayso. Taageerada ehelka waxaa loogu talogalay adiga taageera qof lixaadkiisu dhamaystirnayn, jir ahaan ama caafimaad darro nafsiy-adeed ama da' wayn keliya. Wixii warbixin intaa dheer waxaad kala xiriiri kartaa la taliyeyaasheena ehelka. Waxaa na saaran waajib sir xajin oo dhammaan xiriirada aad la yeelatid la taliyaha ehelka waa bilaash. Waxaa jira sidoo kale warbixin intaa dheer oo ku jirta bogga internetka oo ku saabsan taageerada ehelka ee ka jirta magaalada.

Telefoon: 031-366 11 35

E-mail: anhorigstod@vastra.goteborg.se

Bogga internetka:
goteborg.se/anhorigstod



Caafimaadka ardayda qaabilaad wada hadal

**Loogu talogalay adiga leh carruur
6-13 sano jira**

Waa wax iska dabiici in ilmaha laga walwalo oo mararka qaarkood waxaa jira xilliyo ay sii adkaato in la fahmo ama la maareeyo. Haddii ilmahaagu ku jiro da 'da 6-13 sano oo ay dhigtaan iskuul degmo oo ku yaal Askim-Frölunda-Högsbo ama ku yaal Västra Göteborg (Galbeedka Göteborg), waxaad waalid ahaan wici kartaa qaabilaadda ka wada hadalka caafimaadka ardayda. Xaggeena waxaad la hadli kartaa qof cilmi nafsiq bartay oo kaa caawiya inaad ogaatid waxa ilmahaagu u baahan yahay si uu caafimaadkiisu usoo fiicnaado. Wuxaan leenahay hawlo koox ahaan loo sameeyo oo waxaan wada shaqayn la yeelanaa iskuulka markii loo baahdo.

Cinwaan: F O Petersons gata 32
Västra Frölunda

Maxadada: Radiomotet

Telefoon: 073-642 58 53

Bogga internetka: goteborg.se/wps/portal/enhetssida/elevhalsans-samtalsmottagning-i-askim-frolunda-hogsbo-och-vastra-goteborg/samtalsstod

Khadka telefoonka waalidiinta

**Loogu talogalay adiga leh ilmo
0-18 sano jira**

In waalid la ahaado waxay noqon kartaa wax xujooyin badan. Adigo u maraya khadka telefoonka waalidiinta baad waxaad heli kartaa talo iyo taageero ku aadan waalidnimadaada iyadoo loo eegayn inaad leedahay ilmo yar ama dhowriyo toban jir.

Waxaad heli kartaa taageero adigo wada hadal telefoonka kula yeelanaya qof qoysaska ka caawiya xalinta khilaafaadkooda ama waxaad qabsan kartaa ballan shakh-siyeed. Khadka telefoonka waxaa shaqaale joogaa isniinaha saacada 9-11. Wakhiyada kale waxaa ka jawaabaya cajilad, halkaas oo aad ku reebi kartid magac iyo telefoonnummer, markaas baa lagu soo wacayaa sida ugu dhaqsiyaha badan ee ugu macquulsan. Waxaad khadka telefoonka waalidiinta sidoo kale ka heli kartaa warbixin ku saabsan waxbarasho waalidiintu koox ahaan u qaataan.

Cinwaan: Topasgatan 13 B

Telefoon: 031-366 42 12

Bogga internetka: goteborg.se/foraldrastodvastaрагoteborg

Qaabilaadda dhalinyarada Väst

13-24 sano

Halkaan waxaa adiga da'daadu u dhexayso 13-24 sano uga hadli kartaa wax kasta oo ku saabsan galmo, jacayl iyo dhacdooyinka adag illaa cudurrada xubnaha taranka iyo had-dii aad wax iska waydiinasid nolosha. Wuxaan sidoo kale lagaa qaadi karaa tijaabo uur inuu jiro lagu ogaanayo. Xaggeena waxaad ka heli kartaa daawayn dhakhtar iyo daawayn nafsiyadeed, taageero iyo warbixin. Qaabilaadda waxaa ka shaqeeya umuliso, kalkaaliso, la taliye, qof cilmi nafsiga bartay iyo dhakhtar ku takhasusay cudurrada guud. Waxaa sidoo kale jira qaabilaado dhalinyaro kale oo Göteborg ku yaal oo aad aadi kartid. Wuxaan shahaado ku haysa-naa HBTQ.

Cinwaan: Kaverös Äng 5
Västra Frölunda

Maxadada: Musikvägen

Bogga internetka:
goteborg.se/um

umo.se-halkaan waxaa ku jira jawaabo su'aalo ku saabsan galmo, caafimaadka iyo xiriirada jacayl

Mini-Maria bartamaha magaalada /Galbeed

Loogu talogalay dadka gaaray 21 sano oo qaba su'aalo ku saabsan khamriga iyo daroogo.

Da'yarta su'aalahaa qaba ama dhi-baatooyin quseeya khamriga ama maandooriye (daroogo) waxay taageero iyo daawayn ka heli karaan Mini-Maria. Xarumaheena qaa-bilaadda waxaa ka shaqeeya dad cilmiya bulshada bartay, kalkaali-syoojin, dad cilmi nafsiga bartay, dhakhtar iyo xog haye.

Xattaa adiga waalidka ah wuxaad heli kartaa talo iyo taageero. Wuxaad imaan kartaa Mini-Maria keligaa ama adigoo la socda ilmahaaga. Wuxaan sidoo kale leenahay waxbarasho waalidiinta la baro inay aqoon u yeeshaan xashiiska iyo daroogada. Waa bilaash in nala soo booqdo waajib sir xajinna wuu na saaran yahay.

Cinwaan: Norra Hamngatan 8, plan 4

Maxadada: Domkyrkan eller Stenpiren

Telefoon: 031-367 99 40

Bogga internetka: minimaria.se

Hälsoteket ku yaal Väster (galbeedka)

Da' kasta

Waxaan u jirnaa si adiga deggan agagaarka aad u hagaajisid (wax kadesho) caafimaadkaaga. Xaggeena waxaad ka heli kartaa wada hadal ku saabsan caafimaadka, waxaad ka qaybgeli kartaa cashar jeedin, waxyaalo firfircooni (isboorti) ama iska qori kartaa koorsooyin.

Adiga waalidka u ah carruur yaryar wuxuu Hälsoteket kusoo qabanqaa-binayaa soo lugayn gaariga ilmaha lagu qaato lala soo lugaynayo oo

laga wada hadlayo talooyin nolol-maalmeedka ku saabsan iyo fikrado cusub oo dhiirigelin leh.

Dhammaan hawlaha Hälsoteket waa bilaash wuxuna dhowr meelood oo kala duwan uga yaal koonfur-galbeed Göteborg, oo ay ka mid tahay Frölunda Kulturhus. Waxed barnaamijkeena ka helaysaa bogga internetka. Soo dhawow!

Cinwaan: Frölunda Kulturhus, Valthornsgatan 13, Västra Frölunda

Maxadada: Frölunda torg

Telefoon: 031-366 28 64

Bogga internetka:
goteborg.se/halsoteketvaster



Hage (qof kugu caawinaya inaad heshid warbixinta iyo caawinaadda aad u baahan tahay) loogu talogalay carruurta iyo dadka waawayn ee lixaadkoodu dhamaystirnayn

Da' kasta

Ma qabtaa su'aalo ku saabsan taageero ama xuquuq aad leediihin adiga ama ilmahaaga lixaadkoodu dhamaystirnayn? Markaas qofka hage-ha ah baa kaaga warbixin kara oo kugu hagi kara taageerada bulshada ay ka heli karaan carruurta iyo dadka waawayn ee lixaadkoodu dhamaystirnayn. Waxay tusaale ahaan noqon kartaa waxqabadyada degmadu u fidiso, waxqabadyada daryeelka caafimaadka, qalab caawinaad, guriga oo la waafajiyo baahida qofka iyo adeegga gaadiidka dadka lixaadku dhamaystirnayn (färdtjänst).

Cinwaan: Gårdavägen 2, Göteborg

Telefoon: 031-367 98 08

E-mail: lotsforbarnochvuxna@socialresurs.goteborg.se

Bogga internetka: goteborg.se/lotsforbarn

Naafo

Adiga waalidka u ah ilmo lixaadkoodu dhamaystirnayn oo u baahan caawinaad* waxaad taageero iyo adeeg dadwayne ka codsan kartaa laanta naafada qaabilsan. Kusoo dhawow inaad nala soo xiriirtid haddii aad qabtid wax su'aal ah oo ku saabsan waxqabadka ama sida aad u codsan kartid taageero.

**Sharciga caawinta iyo adeegga dadwayne ee loogu talogalay dadka naafada ah qaarkood (LSS) iyo sharciga adeegga bulshada (SoL) baa maamula nooca waxqabad ee dadka lixaadkoodu dhamaystirnayn xaqqa u leeyihiin.*

Cinwaan: Järnbrotts prästväg 2

Maxadada: Radiovägen

Telefoon: 031-366 56 21

Wakhtiyada telefoonka lagu la xiriiri karo Telefontider: Isnii ,arbaco , khamiis iyo jamce saacadaha. 8-12 talaadooyinka saacadaha. 12.30-18.30

E-mail:

funktionshinder@vastra.goteborg.se

Caawin ehel (xigto)

Loogu talogalay adiga jira laga bilaado 18 sano

Adiga caawiya qof aad ehel tihi-in waxaad laftarkaagu u baahan kartaa caawinaad. Da' da qofka ehelka ah wax micne ah ma samay-naso. Caawinaadda ehelka waxaa loogu talogalay adiga caawiya qof lixaadkiisu uusan dhamaystirnayn, jir ahaan ama maskax ahaan ama waayeelnimo keliya. Wixii warbixin intaa dheer waxaad kala xiriiri kartaa la taliyeyaasha ehelka.

Waxaa nasaaran waajib sir xajin oo dhammaan wixii xiriir lala samay-nayo la taliyeyaasha ehelka waa bilaash.

Wixii warbixin intaa dheer oo ku saabsan caawinaadda ehelka ka jirta magaalada waxay ku jirtaa bogga internetka.

Telefoon: 031-366 11 35

E-mail: anhorigstod@vastra.goteborg.se

Bogga internetka:

goteborg.se/anhorigstod

Talo iyo taageero loogu talogalay adiga leh carruur uusan lixaadku dhamaystirnayn

Laanta taageerada qoyska

Ma tahay waalid ama ehel ma la tahay ilmo da 'yar ama dhalinyaro qaangaar ah oo ay ku adag tahay inuu maskaxdiisa soo jeediyo, fe-ejignaado, is xakameeyo, waxbarto, khasab ama akhlaaq? Waxaa qaybta caawisa qoysaska ka heli kartaa

talobixin telefoonka ah, wada hadal lagugu caawinayo, cashar jeedin iyo waxbarasho waalidiinta loogu talogalay. Laanta qoyska taageerta waxaa maamula Ågrenska oo waxaa u dirsaday Göteborgs Stad.

Cinwaan: Järnbrotts Prästväg 2, våning 4, ingång Teknikhuset (Västra Frölunda)

Telefoon: 070-934 69 40 eller 070-82 55 096

E-mail: familjestodsenheten@agrenska.se

Bogga internetka: agrenska.se/vi-erbjuder/familjestodsenheten



Daryeelka caafimaadka iyo cudarrada

Rugaha caafimaadka iyo rugaha caafimaadka carruurta (BVC)

Halkaan waxaa ka helaysaa xogaha meelaha laga la xiriiru rugaha caafimaadka galbeedka Göteborg. Halkaan wuxaad la xiriiraysaa haddii adiga ama ilmahaagu u baahan tiihiin daryeel caafimaad. Rugaha caafimaadka waxay sidoo kale leyihiiin Rugo caafimaadka carruurta (BVC). BVC wuxaad ka helaysaa caawinaad waalid ahaan ku aadan doorkaaga waalidnimo oo waxay kugu caawinayaan in ilmahaagu sameeyo horumar fiican marka laga hadlayo caafimaadka iyo aamin qabidda.

Närhälsan Kungssten

Rugta caafimaadka

Cinwaan: Knipplagatan 2, Göteborg

Telefoon: 031-345 03 00

BVC

Cinwaan: Varholmsgatan 2 A
Göteborg

Telefoon: 031-345 03 60

Närhälsan Opaltorget

Rug caafimaad

Cinwaan: Grevegårdsvägen 198 B
Västra Frölunda

Telefoon: 031-346 08 00

BVC

Cinwaan: Bronsåldersgatan 82
Västra Frölunda

Telefoon: 031-747 83 90
031-747 83 91, 031 - 747 83 92

Närhälsan Rugta caafimaadka iyo BVC Styrsö

Cinwaan: Brattenvägen 13, Styrsö

Telefoon

Rugta caafimaadka: 031-747 80 50
BVC: 031-747 80 76

Johannesvården Rugta caafimaadka iyo BVC

Cinwaan: Trollbärsvägen 16
Västra Frölunda

Telefoon: 031-89 29 30

Bogga internetka:

ptj.se/johannesvarden/start/

Omtanken Grimmered

Cinwaan: Lergöksgatan 2
Västra Frölunda

Telefoon: 031-380 48 40

Bogga internetka: omtanken.se

Omtanken Frölunda Torg

Cinwaan: Frölunda Torg
Västra Frölunda
Iridda laga soo galo Lilla
Marconigatan 31

Telefoon: 031-380 48 40

Bogga internetka: omtanken.se

Wästerläkarna Hängpilsgatan

Cinwaan: Hängpilsgatan 3
Västra Frölunda

Telefoon

Rugta caafimaadka: 031-29 90 70

BVC: 031-29 51 50

Bogga internetka: wasterlakarna.se

Rugta caafimaadka waayeelka 70+

Cinwaan: Hängpilsgatan 7
Västra Frölunda

Telefoon: 031-29 69 70

Wästerläkarna Redegatan

Rugta caafimaadka

Cinwaan: Redegatan 1B
Västra Frölunda

Telefoon: 031-29 90 95

BVC

Cinwaan: Redegatan 1C
Västra Frölunda

Telefoon: 031-29 90 95

Bogga internetka: wasterlakarna.se

Daryeelka ilkaha dadwaynaha

Waxaan carruurta iyo dadka
waawaynba ku caawinnaa waxyaa-
lo badan laga bilaabo taloooyin ku
saabsan ilkaha iyo baaritaanno caa-
di ah illaa daawayno dhib badan.

Waxaanu bixinaa daryeel ilkood
casri ah oo ku salaysan aqoon
cilmiyaysan iyo khibrad lasoo tija-
abiyay. Waxaan sidoo kale wada
shaqayn dhow leenahay saaxiiba-
deenna shaqo ee daryeelka ilkaha
takhasuska ah.

Daryeelka ilkaha dadwaynaha (Folktandvården) Frölunda Kulturhus

Cinwaan: Valthornsgatan 13
Västra Frölunda

Telefoon: 010-441 96 10

Daryeelka ilkaha dadwaynaha (Folktandvården) Topas

Cinwaan: Topasgatan 59
Västra Frölunda

Telefoon: 010-441 83 70

Daryeelka ilkaha dadwaynaha (Folktandvården) Styrsö

Cinwaan: Brattenvägen 13, Styrsö

Telefoon: 010-441 88 30

Bogga internetka:
folktandvarden.vgregion.se

Qaabilaadda caafimaadka carruurta iyo dhalinyarada

Waxaan nahay qaabilaad furan oo bixisa daryeel caafimaad takhasus ah oo loogu talogalay carruurta iyo dhalinyarada da'doodu u dhexayso 0-18 sano. Waxaan samaynaa baa-ritaanno caafimaad iyo daawayn xanuunada aan bixin oo aan keenin in ilmahaaga isbitaal loo dhigo. Badanaa waxaad noogu imaanaysaa soo gudbin ay kusoo gudbiyeen rug caafimaad ama isbitaalka.

Cinwaan: Topasgatan 59
Västra Frölunda

Telefoon: 031-747 93 60

Bogga internetka:
vgregion.se/regionhalsan/bum

1177 – Jiheeyaha daryeelka

Meesha Iswiidhan oo dhan lagu uruuriyo maclumaadka iyo adeegyada caafimaadka iyo daryeelka. Wac 1177 si aad u heshid talobixin caafimaad. Wuu furan yahay habeen iyo maalin.

Bogga internetka: 1177.se

Qaabilaadaha furan ee loogu talogalay da'yarta caafimaad darrada nafsiyadeed haysato

Haddii ilmahaagu leeyahay astaamo cudur nafsiyadeed iyo dhiminaans-ho lixaadeed waxaad la xiriiri kartaa caafimaadka dhimirka carruurta iyo dhalinyarada, BUP. Waxaa carruurta iyo dhalinyarada leh caafimaad darro nafsiyadeed oo fudud ay sidoo kale la xiriiri karaan rugaha caafimaadka JohannesVården iyo Omtanken. Waa kuwa loo xisaa-ray daryeelkaa dheeriga ah inay bixiyaan.

JohannesVården iyo Omtanken rug caafimaad

Qaabilaadaheena loogu talogalay carruurta iyo da'yarta qaba caafimaad darro nafsiyadeed waxaan qaabilnaa carruurta da'doodu u dhexayso 6-17 sano (sannadka ilmuu buuxsho 18). Xattaa waali-diinta waan soo dhawaynanaa inay nala soo xiriiraan.

Waxaad u baahan tahay inaad iska qortid rugaheena caafimaadka oo markaas caawinaadu waa bilaash. Waxaan samaynaa qiimayno oo waxaan kuu fidinaynaa waxqabad xilli hore, shakhsii ahaan, koox ahaan oo internetka kaa siinaynaa.

Ma qaabillo dadka naloo soo gudbiyo, si toos ah baad daryeel nooga soo raadsanaysaa.

Xaggeena waxaan kaa caawin karnaa:

- » Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo inaad maaraysid cabsida, walbahaarka iyo walwalka.
- » Haddii aad qabtid dhibaato hurdo ama kadeed (kurbo)
- » Haddii aad murugaysan tahay ama niyad jabsan tahay
- » Haddii dhibaato kaa haysato is xakamayn la'aan iyo caro
- » Haddii aad waalid ahaan caawi-naad ugu baahan tahay doorkaaga waalidnimo

JohannesVården

Cinwaan: Trollbärsvägen 16

Telefoon: 031-89 29 35, 073-501 28 35

Bogga internetka:

[ptj.se/johannesvarden/
ungaspsykiska-halsa/](http://ptj.se/johannesvarden/ungaspsykiska-halsa/)

Omtanken rug caafimaad

Cinwaan: Frölunda torg, Maxadada tareenka magaalada dusheeda, si dadban uga soo horjeeda kulturhuset

Telefoon: 031-380 48 44

Bogga internetka:

[omtanken.se/
hos-oss/vardcentraler/
for-barn-och-unga-1403/](http://omtanken.se/hos-oss/vardcentraler/for-barn-och-unga-1403/)

Vid akuta
situationer
ring 112

Caafimaadka dhimirka ee carruurta iyo dhalinyarada BUP, Frölunda

Waxaan qaabilnaa adiga 18 sano ka yar oo leh astaamo cudur oo nafsiyadeed iyo caqabado nolosha kaa hor istaagay sida tusaale ahaan walbahaar, niyad jab, is xakamayn la'aan iyo dabeeecad caro badan oo aan la maamuli karin, dhibaato ka haysato soo jeedinta miskaxda, dhibaato ka haysato la macaamilka bulshada, dabeeecad wax khasbid leh oo dhibaato ka haysato cuntada .

Markii aad daryeel nooga baahatid waxaan u baahanahay inaan wax ka ogaano jirrada ama dhibka ku haysta. Warbixintaas waxaan ku heli karnaa iyadoo dhakhtar rugtaada caafimaadka jooga ama dhakhtar kale noo soo qoro soo gudbin. Waxaan adiguna sidoo kale soo qoran kartaa codsi daryeel.

Waxaad wici kartaa BUP si aad u heshid talobixin iyo la talin.

Cinwaan: Frölunda torg
Västra Frölunda

Telefoon: 031-342 54 51
Wixii arrimo degdeg ah iyo talobixin iyo la talin 031-342 54 55

Bogga internetka:
sahlgrenska.se/bup-frolunda

Markii hanjabaad iyo xoog adeegsi ka dhex dhaco dad xiriir dhow leh

Ma ku nooshahay hanjabaad iyo xoog adeegsi qoyska dhexdiisa ah, qaraabo ama cid kale oo aad xiriir dhow leedihiin? Ma laguu gaystaa dhibaato nafsiyadeed, dhaqaale, jinsiyeed ama xoog adeegsi sida kala tuurid, laadid iyo gacanqaad? Ma u adeegsatay qof kale xoog? Waxaad halkaan ka heli kartaa caawinaad iyo taageero.

Booliis

Si aad usoo sheegtid wixii degdeg ah wac 112.

Wixii arrimaha kale iyo talooyin ah wac 114 114.

Xafiiska adeegga bulshada

Xafiiska adeegga bulshada waaxdaada degmo ku yaal waxaad ka heli kartaa talo iyo taageero si aad ugu noolaatid nolol amni iyo madaxbanaani leh. Waxaan bixinaa taageero iyo gabbaad markii loobaalido. Halkaan baad ka codsan kartaa taageero haddii aad:

- » Xaalad mushkilad qoys ku haysato
- » Aad ku jirtid xaalad qoys qof noloshiis halis ku jirto
- » Dhib kaa haysto khamri iyo si xun u isticmaalid daroogo
- » Ku haysato caafimaad darro nafsiyadeed

» Lixaadkaagu dhamaystirnayn
» Ku haystaan dhibaatooyin dhaqaale oo aadan isdabari karin.
Markii xafiiska adeegga bulshadu xiran yahay, kala xiriir xafiiska adeegga bulshada heeganka ah telefoonka 031-365 87 00.

Cinwaan: Topasgatan 58
Västra Frölunda

Telefoon: 031-365 00 00
(Göteborgs Stads kontaktcenter)

E-mail: vastragoteborg@vastra.goteborg.se

Cinwaanka boostada:
Box 334, 421 23 Västra Frölunda

Xafiiska adeegga bulshada Göteborgs Stad ee heeganka ah

Xafiiska bulshada heeganka ah waxaad ka helaysaa caawinaad degdeg ah fiidkii, habeenkii iyo maalmaha fasaxa ah. Waxay noqon

kartaa xoog adeegsi, wax si xun u isticmaalid, meel aad degtid ama haddii aad ka shakisan tahay in qof noloshiis halis ku jirto.

Cinwaan: Stora Badhusgatan 14
Göteborg

Maxadada: Stenpiren

Telefoon: 031-365 87 00

Bogga internetka:
goteborg.se/socialjouren

Xarunta xasaradaha ee taageerta carruurta iyo da'yarta

Loogu talogalay adiga ah carruur iyo dhalinyaro

Mararka qaarkood waxaa dhici kara waxyaalo dhib badan oo keena in xaaladaada caafimaad xumaato ama aad cabsanaysid. Waxaa laga yaabaa in guriga dhib kugu haysto oo la joogtid dad waawayn oo is dagaala, cabba khamri badan ama qaata daroogo.

Waxaad mar kasta wici kartaa xafiiska adeegga bulshada waaxdaada degmo ku yaal, oo furan maalmaha shaqo. Xafiiska adeegga bulshada heeganka ah baa caawinaad degdeg ah ka helaysaa fiidatkii, habeenada iyo maalmaha fasaxa ah markii xafiiska adeegga bulshada waaxaha degmadu xiran yihiin. Waxay ku saabsanaan kartaa xoog adeegsi, wax si xun u isticmaalid, guri la'aan ama haddii aad ka shakidid in qof noloshiisu halis ku jirto.

Telefoon: 031-365 00 00
(Göteborgs Stads kontaktcenter)

E-mail: vastragoteborg@vastra.goteborg.se

Markii xafiisku xiran yahay, kala xiriir xafiiska adeegga bulshada telefoonka 031-365 87 00.

Boggaan waxaad ka helaysaa warbixin ku saabsan meesha aad la xiriiri kartid si aad caawinaad u heshid oo qof ula hadashid.

Bogga internetka: goteborg.se/wps/portal/start/social--och-familjefragor/akut-hjalp-socialjour/stod--och-kriscentrum-for-b/

Xarunta xasaradaha loogu talogalay dumarka

Adiga ah qof dumar ah oo loo adeegsaday xoog iyo hanjabaad kaaga timid qof xiriir nololeed idinka dhexeeyo ama qof horay nolol idinkaga dhexaysay, waxaad nala soo xiriiri kartaa habeen iyo maalin sannadka oo dhan. Waxedaan adiga iyo ilmahaaga u fidin karnaa meel aad degtaan oo gabbaad ka heshaan iyo wada hadal lagugu taageerayo.

Cinwaan: Carl Grimbergsgatan 7
Göteborg

Telefoon: 031-367 93 80

Bogga internetka: goteborg.se/kriscentrumforkvinnor

Khadka dhowrista dumarka

Khadka dhowrista dumarka waa khad telefoon dhexe (heer qaran) loogu talogalay adiga xoog iyo hanjabaad loo adeegsaday. Adiga ehel iyo saaxiib la ah waad soo wici dumarka wuxuu furan yahay habeen iyo maalin waxaana kusoo wacaysaa bilaash. Telefoonka inaad nala hadashay lagama arki karo warqadda lacagta telefoonka

Telefoon: 020-50 50 50

Bogga internetka:
kvinnofridsljen.se

Xarunta xasarada loogu talogalay ragga


Loogu talogalay adiga jira 18 sano iyo wixii ka wayn

Qaabilaadha waxaa loogu talogalay adiga dhibaato kaa haysato cid aad xiriir dhow leediihiin. Waxay noqon kartaa dhibaato qof xiriir nololeed idinka dhexeyyo, xasarad ka dhatalay kala tag, dhibaatooyin dhanka waalidnimada ama aad xoog u adeegsatay cid xiriir dhow idinka ka dhexeyyo. Waxay sidoo kale noqon kartaa arrimo ku saabsan la kulmidda iyo mas' uuliyadda carruurta.

Cinwaan: Kronhusgatan 2F

Telefoon: 031-367 93 90

Bogga internetka: goteborg.se/kriscentrumforman



Markii uu jiro xoog adeegsi iyo cabburin la xiriirta sharaf ilaalin

Ma la nooshahay adigu ama cid kale oo kaa agdhow xoog adeegsi la xiriira sharaf ilaalin, cabburin oo ma u baahan tahay taageero iyo caawinaad?

- » Ma ku kontoroolaan qoyskaaga iyo/ama qaraabadaada?
- » Ma lagaa sugayaa inaad isha ku haysid qof reerka ka mid ah?
- » Ma ka walwalsan tahay mustaq-balkaaga iyo in lagaa hor istaago in wixii aad rabtid dooratid?
- » Ma ku khasban tahay inaad qarisid qofka aad jeceshahay ama aad la kulmaysid?
- » Ma laguu gaystay xoog adeegsi ama xadgudub?

Kooxda loo xilsaaray dhibaatooyinka Sharaftha ilaalinta ka dhasha

Waxaad la xiriiri kartaa kooxda loo xilsaaray dhibaatooyinka sharaf ilaalinta ka dhasha si aad u heshid talobixin iyo caawinaad. Uma baahnid inaad sheegtid qofka aad tahay. Waan warwareegnaa oo waxaan kugu la kulmi karnaa meel kugu haboon.

E-mail: resursteam@vastra.goteborg.se

Telefoon: 070-417 95 46

Bogga internetka: goteborg.se/wps/portal/start/social--och-familjefragor/missbruk-vald-och-brott/vald-och-hot/hedersrelaterat-vald-och-fortryck/hederskultur

Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa meelaha ku hoos qoran cinwaanka Hanjabaad iyo xoog adeegsi ka dhex dhaca dad xiriir dhow leh.

Kuwo kale oo aad la xiriiri

BRIS - Xuquuqda carruurtu bulshada ku leeyihiin

Waxaa BRIS lasoo xiriiri kara adiga illaa 18 sano wixii loo gaaro ah oo caawinaad u baahan. Waad qarin kartaa qofka aad tahay oo qofka la taliyaha ah waxaa saaran waajib sir xajin. Waa bilaash in la waco oo wada hadalka laga arki mayo telefoonkaaga. Waxaad sidoo kale tirtiri kartaa raadraaca boggaga aad kombuyuutarka ka booqatay haddii aadan rabin in la arki karo inaad booqatay bogga internetka Bris. Waxaad sidoo kale kala hadli kartaa bogga internetka dhalinyaro kale oo gole ka tirsan.

Xattaa dadka waawayn ee qaba fikarro ama su'aalo ku saabsan ilmihiisa wuxuu wici karaa.

**Telefoon loogu talogalay
waalidiinta iyo dadka waawayn:**
077-150 50 50

**Telefoon loogu talogalay carruurta
iyo dhalinyarada:**
116 111

Bogga internetka: bris.se

Rädda Barnen (hey'adda badbaadada carruurta)

Telefoonka loogu talogalay ciddii ka walwalsan xagjirnimo

Telefoon: 020-100 200

Taageero loo fidhiyo adiga da'da yar oo ku nool cabburin sharaf ilaalin la xiriirta

Chatt: karlekenarfri.se

E-mail: stodchatt@rb.se

Stadsmissionen Golaha dhalinyarada

16-25 sano

Waxaa Stadsmissionen (hey'ad samafal degmo masiixi ah) waxaa adiga da'diisu u dhexayso 16-25 sano kula kulmi kartaa kuwo kale oo aad isku da'thiin "Mötessplats Vardagsrummet" ama ka qayb-qaan kartaa hawlo kale oo koox ahaan loo samaynayo oo bilaash ah. Gal bogga internetka si aad u heshid warbixin cusub oo ku saabsan wakhtiyada la furo iyo kooxaha.

Waxaa sidoo kale jirta fursad in lagu la yeesho wada hadal jihayn ah oo kula yeesho la taliye dhalinyaro.

Bogga internetka: stadsmisionen.org/detta-gor-vi/barn-unga-familjer/unga-forum/

Räddningsmissionen carruurta iyo qoyska

Waxaan ka shaqaynaa inaan abuur-no baro kulan iyo xiriiro bulsho kuwaas oo xoogga lagu saarayo carruurta iyo arrimaha carruurta ku saabsan. Waxaan sidoo kale le-enahay baro kulan loogu talogalay dadka waddanka ku cusub halkaas oo luuqadda, xiriirada bulsho iyo wax hindisid xoogga la saarayo.

Bogga internetka:
[raddningsmissionen.se/
verksamhetssomraden/barn-
och-familj](http://raddningsmissionen.se/verksamhetssomraden/barn-och-familj)

Göteborgs kyrkliga stadsmission (hey` adda samafalka kaniisadda magaalada Göteborg)

Dadka oo dhan waxay u arkaan inay khalad tahay in dadka ay isku dhow yihiin ku noolaadaan xaalad ay dareemayaan inay bulshada ka dhex baxsan yihiin . Waa inaan arrintaas wax ka qabano.

Bogga internetka:
stadsmisionen.org

Laanqayrta cas (Röda Korset)

Taageero loo fidiyo dadka dalkooda dib ugu noqonaya

Su'aalo ma ka qabtaa inaad dalkaaga dib ugu noqotid? Su'aalo ma ka qabtaa habka loo maro codsiga magangalyada? waxaad markaas la xiriiri kartaa telefoonka talobixinta Laanqayrta Cas.

Telefoon: 020-415 000
Talaado, arbaco iyo talaado
Saacadaha. 09.30-12

Bogga internetka: [rodakorset.se/
fa-hjalp/asylfragor/stod-
till-atervandande/](http://rodakorset.se/fa-hjalp/asylfragor/stod-till-atervandande/)

Kaniisadda Equmeniakyrkan

E-mail: info@equmeniakyrkan.se
Bogga internetka:
equmeniakyrkan.se

Kaniisadda Pingstkyrkan Västra Frölunda

Cinwaan: Diamantgatan 3
Västra Frölunda

Maxadada: Briljantgatan

Telefoon: 031-45 04 51

E-mail: info@frolunda.pingst.se

Bogga internetka: frolunda.pingst.se

Kaniisadda Iswiidhan

Bogga internetka:

svenskakyrkan.se/sokforsamling

Talobixinta qoyska ee

Kaniisadda Iswiidhan

Talobixinta qoyska ee kaniisadda Iswiidhan waxaa loogu talogalay lammaane iyo qoysas dareemaya inay dhibaato ka haysato xiriiradooda bulsho ee kala duwan.. .

Bogga internetka: svenskakyrkan.se/familjeradgivningen/goteborg

Lugayn lagu sii hagaajinayo amniga Tynnered

Tynnered waxaa ka jira laba kooxood oo lugeeya, Nattvandring Tynnered och Trygghetsvandring Norra Tynnered. Hadafku laga leeyahay lugaynta waa in amniga kor loo qaado iyadoo dadka waawayn bannaanka lagu arkayo. Ma danay-nasaa inaad ka qaybgashid ama ma rabtaa inaad wax kasii ogaatid markaa waad nala soo xiriiri kartaa.

Nattvandring Tynnered



Trygghetsvandring Norra Tynnered

E-mail:

norratynnered@nattvandring.nu



La socodka xaaladda dhalinyarada markay bannaanka joogaan

Kooxda la socda hawlaho dhalinyarada markay bannaanka joogaan waxay u tagaan dhalinyarada jooga bartamaha Tynnered oo waxay taageero siiyaan dhalinyarada u dhexeeya 13-18 sano. Waxay noqon kartaa wada hadal, in lagu sii hago ururo iyo in loo helo wax ay qabtaan. Waxay dhalinyarada kula kulmaan iskuulka iyo meelaha firaaqada lagu qaato. Kooxda la socodka xaaladda dhalinyarada bannaanka waxaa la heli karaa wakhtiyoo ha-been iyo maalinba ahba.

Cinwaan: Topasgatan 13 B

Telefoon: 073-624 83 91

ama 072-721 48 47



